

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA  
XAFIISKA NOOTAAYAHA & LATALINTA  
ARRIMAHHA SHARCIGA EE TAYO  
MUQDISHO - SOOMAALIYA



جمهورية الصومال الفدرالية  
مكتب تيو لتوثيق العقود  
والإستشارات الشرعية  
مقديشوا - الصومال

SHARCIGA DHISMAHA FARMASHIGA

(GOOD CARE PHARMACY)

MUQDISHO - SOOMAALIYA



**GOOD CARE**  
— **CLINIC** —

2023

**MASAWIRKA MILAYAASHA**

CABDULLAAHI CALI JABIN.



ISMAACIIL MAXAMED C/RAXMAAN



**UJEEDDO:DHISMO SHARCI FARMASHI MAS'UULIYADEEDU XADIDDAN  
TAHAY, OO LAGU MAGACAABO (GOOD CARE PHARMACY)**

Maanta oo ay taariikhdu tahay **15/4/2023** Anigoo ah **Dr.Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Notaayo" Gaab**, lehna Xafiiska Nootaayaha Tayo Public Notary ee ku yaalla Xamar,degmada H/Wadaag Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheyn ee Magaalada Muqdisho,waxaa xafiiska iigu yimid mudanayaasha kala ah:-

**1-Ismaaciil Maxamed C/raxmaan** , Sita Warqad Sugnaan Lr:292540 kana Soo Baxay D/Hoose Ee Muqdosho.

**2- C/Ilaahi Cali Jabin**, Sita baasaboorka lambarkiisu yahay P01071012.

Mudanayaasha kor ku xusan iyagoo caafimaad qaba, caqligooduna taam yahay, cid heshiisnaan ku qasabtayna aysan jirin qowl iyo ficilba, waxay i weediisteen inaan u qoro heshiis ku saabsan dhismo Farmashi oo ka kooban qodobada hoos ku qoran:-

**QODOBKA 1-AAD**

**MAGACA IYO ASTAANTA FARMASHIGA**

**(GOOD CARE PHARMACY)** Waa Farmashi gaar loo leeyahay (Private Company).



**QODOBKA 2-AAD**

**WAQTIGA LA' AASAASAY FARMASHIGA**

FARMASHIGA **(GOOD CARE PHARMACY)** waxaa la'aasaasay **11-11-2020**, waxaana lagu aasaasay magaalada Muqdisho caasimadda Soomaaliya.

**QODOBKA 3-AAD**

**NOOCA FARMASHIGA**

Farmashigan Waa Farmashi Gaar Loo Leeyahay, Waxaana Ku Soo Biiri Kara Saamiley Kadib Markey Saxiixaan Maamulaha Guud Iyo Maamulaha Ku Xigaanka Farmashiga.

**QODOBKA 4-AAD**

**XARUNTA FARMASHIGA**

Xarunta Farmashiga waa Muqdishu caasimadda Soomaaliya Degmada Garasbaaley –Waaxda Baariyoow, Xarumaha, Farmashiga waa la kordhin karaa markii loo baahdo waxaana lagala xiriirayaa Maamulaha guud Iyo Maamulaha Ku Xigaanka ee Farmashiga.

### QODOBKA 5-AAD

#### UJEEDDOOYINKA FARMASHIGA

1- ka Ganacsiga Daawoyinka Nucyahooda kala Duwan Oo Tafaariiq ah.

### QODOBKA 6-AAD

#### RAASIMAALKA FARMASHIGA & SIDA MILKIILAYAASHA U KALA LEEYIHIIN

Raasumaalka Farmashigu waa lacag dhan US \$6,000 (Lix kun oo doolarka Mareykanka ah) Waxayna u kala leeyihiin Milkiilayaasha Farmashiga sida shaxda ku cad.

No.	Magaca Milkiilayaasha	Lacagta	Saamiga
1	Ismaaciil Maxamed C/raxmaan	\$ 3,000	50 %
2	C/llaahi Cali jabin	\$ 3,000	50 %

### QODOBKA 7-AAD

#### GADASHADA SAAMIGA

Marka Uu ku soo biiro Saamile kale waxaa uu xaq u leeyahay in uu gato saamigiisa marku rabo waana inuu u gudbiyaa Milkiilayaasha Farmashiga iyadoo qoraal ah, haddii looga gadan waayo muddo 90 maalmood ah, wuxuu u madax banaan yahay in uu ka gato cidduu rabo. Saamiyada waa la kordhin karaa haddii loo baahdo saamiga islamarkaana saamile kasta waxaa uu xaq uleeyahay inuu kordhin karo saamigiisa .

### QODOBKA 8-AAD

#### QAYBSASHADA FAA'IIDADA IYO KHASAARAHA

Faa'iidada iyo khasaara wixii yimaado waxaa iska leh dhamaan Milkiilayaasha, iyo Saamileeda.

### QODOBKA 9-AAD

#### SHAKHSIYADDA QAANUUNIGA EE FARMASHIGA

Farmashiga wuxuu leedahay xuquuq qaanuuni ah, haddaba Magaca Farmashiga ayaa loo isticmaalayaa dhammaan hantida Farmashiga sida: Daawooyinka Nucyihiisa kala duwan, sumadaha Farmashiga iyo tiimbarayaasha.

### QODOBKA 10-AAD

#### QAAB DHISMEEDKA IYO MAAMULKA FARMASHIGA

C/LLAHI CALI JABIN

***Maamulaha Guud Ee Farmashiga***



ISMACIL MAX'ED C/RAXMAN

***Maamul Ku Xigaanka Ee Farmashiga***

### **QODOBKA 11-AAD**

**AWOODAHA MAAMULKA GUUD IYO MAAMUL KU XIGAANKA FARMASHIGA**  
**Awoodaha Maamulaha Guud Iyo Maamul Ku Xigaanka Farmashiga.**

- 1- Waa Matalaayasha Farmashiga ee dhammaan heshiisyada ay Farmashiga galayso.
- 2- Waxay siin karaa wakaalad guud ama mid gaar ah Cidii ay doonaan.
- 3- Dabagalka iyo kormeeridda Dhammaan Shaqooyinka Farmashiga
- 4- Waxay Maamulayaan akoonada Farmashiga ee ka furan bankiyada dalka.
- 5- Samaynta Xisaab Xir Sanadeedka Farmashiga

**FG:- Waxaa akoonka lacagta ka bixin karaan 1- C/llaahi Cali Jabin, 2-ISMAACIIL MAXAMED C/RAXMAAN, Si Kali Kali ah ayey Lacagta uga saari karaan Bangiyada Dalka,**

### **QODOBKA 12-AAD**

**GEERI AMA WAALLI KU TIMAADDA MILKIILAYAASHA**

Haddii waalli ama geeri ku timaado Qof ka mid ah, milkiilayaasha Farmashiga waxaa saamigiisa lagu wareejinayaa dhaxaltooyadiisa sharciga ah ama ciddii kale ee maxkamadu u amarto.

### **QODOBKA 13-AAD**

**MUDDADA JIRITAANKA FARMASHIGA**

Farmashiga wuxuu jirayaa muddo dhan **10** sano mudada jiritaanka Farmashiga wa la kordhin karaa haddii ay ogolaadaan milkiilayaasha Farmashiga waana layareyn karaa.

### **QODOBKA 14-AAD**

**BAABI'INTA FARMASHIGA**

Waxa Uu baaba'ayaa Farmashigu marka la helo qodobada soo socdo:-

1. Dhamaanshaha muddada jiritaanka Farmashiga.
2. Go'aan baabi'in ee ka soo baxo Milkiilayaasha.
3. Haddii Farmashigu musalafu Islamarkaana ay u suurta gali weyso inay shaqeeyso.
4. Haddii uu soo baxo sharci baabi'inayo Farmashiga noocan ah.

### **QODOBKA 15-AAD**

**KALA QAYBSIGA HANTIDA FARMASHIGA**

Waxa la magacaabayaa guddi farsamo oo soo aruuriya hantida Farmashiga ee deynta ku maqan iyo midda taala, isla markaasna la bixiyo xuquuqda lagu leeyahay Farmashiga iyadoo lagu saleynaayo xeerka iyo shuruucda lagu dhisay Farmashiga.

### QODOBKA 16-AAD

#### WIXII LAGA WAAYO SHARCIGA DHISMAHA FARMASHIGA.

Wixii aan ku qornayn sharciga dhismaha Farmashiga waxaa loo raacayaa xeerka Farmashiga iyo sharciga Farmashiyaasha ee dalka u degsan.

### QODOBKA 17-AAD

#### DHAQAN GALKA SHARCIGA FARMASHIGA

Sharciga Farmashiga wuxuu dhaqangelayaa marka ay saxiixaan milkiilayaasha Farmashiga, waxayna heshiisaaan ay kala\_saxiixdeen, kadib markii ay akhristeen, raalina ka noqdeen sida aan u qoray heshiisaaan, waana kan saxiixoda hoos ku cad:-

### QODOBKA 18-AAD

**TIRADDA BOGAGGA IYO QODOBADA HESHIISKAAN KA KOOBANAYAHAY**  
heshiisaaan wuxuu ka koobanyahay 18-qodob iyo 5-bog.

#### SAXIIXYADA MILKIILAYAASHA

1-CABDULLAAHI CALI JABIN.

2-ISMAACIIL MAXAMED C/RAXMAAN

*Abdullahi*



*Ismaaciil*



#### ( XAFIISKA NOOTAAYAHA )

REP. 672/TPN/2023 Tr. 15/04/2023, Muqdisho, Aniga oo ah:- **Dr.Maxamed C/Ilaahi Maxamed (Max'ed Notaayo)** lehna Xafiiska Nootaayaha Tayo, Waxaan halkan ku caddeynayaa in heshiiskan dhismaha sharciga Farmashiga ee kor ku xusan uu yahay mid sax ah oo waafaqsan shareecada islaamka iyo shuruudca madaniga ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliya, islamarkaana ay wada saxiixeen milkiilayaasha Farmashiga Nootaayaduna waxey hubisay magacyadooda in ay yahay Kii dhabta ahaa ayna leeyihiin saxiixyada kor ku xusan, waxaana lagu qoray Diiwaanka guud ee Nootaayada.

#### SAXIIXA NOOTAAYAHA

**Dr.Maxamed C/Ilaahi Maxamed (Max'ed Notaayo)**

*Maxamed C/Ilaahi Maxamed*





292540



540637



**DOWLADDA HOOSE EE MUQDISHO  
MUNICIPALITY OF MOGADISHU**

**WARQADDA SUGNAANTA**

Certificate of Identity confirmation

**DUQA MAGAALDA MUQDISHO WUXUU CADDEYNAYAA IN SAWIRKA IYO SUUL SAARIDDA  
HOOS KU TILMAAMAN UU YAHAY QOFKA HOOS KU XUSAN:**

*(The Mayor of Mogadishu hereby certifies that the person whose picture and thumb print appears below has the following details.)*

<b>MAGACA</b> Full Name	<b>ISMAIL MOHAMED ABDIRAHMAN</b>
<b>TAARIKHDA DHALASHADA</b> Date of Birth	04-Apr-1996
<b>GOOBTA DHALASHADDA</b> Place of Birth	MOGADISHU
<b>NUMBERKA KAARKA AQOONSIGA</b> ID Number	292540
<b>JINSI</b> Gender	Male
<b>XAALADA GUURKA</b> Marital Status	Married
<b>DEGGAN</b> Address	Dayniile
<b>MAGACA HOoyADA</b> Mother's Full Names	FADUMO OSMAN ISAK
<b>TARIKHDA LA BIXIYEY</b> Date of Issue	13-Jul-2022
<b>SHAQADA</b> Occupation	XOOGSADE



Right Thumb Print

**Duqa Magaalada ee Muqdisho**  
Mayor of Mogadishu

**Cumar Maxamuud Maxamed**

*Cumar Maxamuud Maxamed*





**DOWLADDA HOOSE EE MUQDISHO**  
**MUNICIPALITY OF MOGADISHU**  
**WARQADDA DHALASHADA**

**Birth Certificate**

**MAGACA**  
Full Name

**ISMAIL MOHAMED ABDIRAHMAN**

**TAARIKHDA DHALASHADA**  
Date of Birth

**04-Apr-1996**

**GOOBTA DHALASHADA**  
Place of Birth

**MOGADISHU**

**JINSI**  
Gender

**Male**

**MAGACA AABAHA**  
Father's Full Names

**MOHAMED ABDIRAHMAN**

**MAGACA HOYADA**  
Mother's Full Names

**FADUMO OSMAN ISAK**

**DEGGAN**  
Address

**Dayniile**

**TARIKHDA LA BIXIYEEY**  
Date of Issue

**13-Jul-2022**

**Duqa Magaalada ee Muqdisho**  
Mayor of Mogadishu

**Cumar Maxamuud Maxamed**



*[Handwritten signature]*






**FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA**

**Tr. 15/04/2023**

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **C/laahi Cali Jabin** oo ka Wakiil ah Loo Caddeeyayaal **Cabdullaahi Cali Jabiin** iyo **Ismaaciil Maxamed C/raxmaan** Dukumiintiga **Original** Caddeynta **Rep No. 672/W.P.N/23, Tr. 15/04/2023**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

<b>Magaca Loo Caddeeyayaasha</b>	Cabdullaahi Cali Jabiin Ismaaciil Maxamed C/raxmaan
<b>Taariikhda Caddeynta</b>	15/04/2023

**Wakiilka Loo Caddeeyayaal:** Aniga oo ah **C/laahi Cali Jabin**, Leh Tel No. **0616548866**, Degan **Muqdisho** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaaday Xafiiska **Nootaayaha Waddani** Dukumiintiga Caddeynta faah faahinteedu Sare ku cadahay ayna leeyihiin **Cabdullaahi Cali Jabiin** iyo **Ismaaciil Maxamed C/raxmaan**.



**SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA**

**Maxamed Cabdi Cali**

**SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA**

**C/laahi Cali Jabin**